

St. Cloud HRA

Barnaamijka Housing Choice Voucher (Section 8)

Liistada sugitaanka oo la furayo

St. Cloud HRA waxay aqbali doontaa arjiga/codsiyada Housing Choice Voucher Program oo internetka laga buuxsanayo laga bilaabo Maajo 2, 2022 12:01 a.m. oo xidhmaya Maajo 6, 2022 11:59 p.m.

Waxaan filaynaa inaan heli doono dalabyo aad uga badan inta Housing Choice Voucher Program ee aan awoodi karno inaan ku meelayo muddo macquul ah gudeheed. Si markaa aanu ula dhaqano si caddaalad ah oo waafaqsan Sharciga Federaalka, waxaanu qorshaynaynaa inaanu arjiyada nasoo gaadha u borosiis garayno hab bakhtiyaa-nasiib ah. Bakhtiyaa-nasiibka macnaheedu waa in ka dib marka dhammaan arjiyadu nasoo gaadhaan, aanu isticmaali doono koombiyuutar si aanu si aan kala sooc lahayn u dooranno 1000 arji oo markaa lagu meeleyo/la geliyo liistada sugitaanka Housing Choice Voucher Program.

Sida loo Codsado

- arjiga waa lagu buuxsan doonaa internetka/ONLINE KALIYA oo ah www.applystcloudhra.com.
- Waqtiga arji qabashadu furantahay, waxaad ka heli kartaa arjiga boggayaga internetka oo aad buuxsan kartaa arjiga waqtii kasta maalin ama habeenba.
- Wuxaan ka aqbaleynaa hal arji oo keliya hal qoys kasta, sidaas darteed soo gudbinta arjiyo badan ayaan kordhin doonin nasiibkaaga helitaanka gargaarka guriyeenta. Arjiga ugu dambeeyey ee aad soo dirto ayaa la tixgelin doonaa.
- Dhammaan arjiyada la soo buuxiyay inta u dhaxaysa Maajo 2, 2022 12: 00 a.m. ilaa Maajo 6, 2022 11:59 p.m. ayaa lagu darayaan bakhtiyaa-nasiibka.
- Maadaama aan ku dooranayno arjiyada lagu darayo liiska sugitaanka hab bakhtiyaa- nasiib ah, ma jirto faa'iido dheeri ah oo ay keenayso in aad buuxsato maalinta koowaad. Dhammaan arjiyada aan helno inta ay furantahay liiska sugitaanku waxay helayaan fursad loo siman yahay in uu kusoo baxo bakhtiyaa-nasiibka.
- Codsadayaasha ku jira liiska sugitaanka HRA kale waa inay buuxsadaan/dalbadaan liiska sugitaanka Housing Choice Voucher Program si lagu daro bakhtiyaa-nasiibka.
- Hayso lambarka xaqiijinta (confirmation number) ka dib markaad internetka ku soo dirto arjigaaga. Lambarka xaqiijinta arjiyada (Confirmation Number) ku guulaysta bakhtiyaa-nasiibka ayaa lagu daabici doonaa website-ka HRA.
- Haddii aan arjigaaga lagu dooranin bakhtiyaa-nasiibka, marna laguma dari doono liiska sugitaanka. Fursadaada kaliya ee aad hay'adeena kaga heli karto foojarka Housing Choice Voucher Program ayaa ah in aad dib u buuxsato marka danbe ee aan liiska sugitaanka furno.
- Codsadayaasha dalbanaya tixgelin (reasonable accommodation) macquul ah waa inay codsi qoraal ah u diraan HRA ugu danbayn 4:00 p.m. Isniinta, Abriil 18, 2022 si loo tixgeliyo.

Xasusin muhiim ah

- 90% codsadayaasha la soo xushay waa inay buuxiyaan shuruudaha mudnaanta HRA, oo ay ku nool yihiin, ka shaqeeyaan ama ay wakhti buuxa dugsi ka dhigtaan (full time) magaalada St. Cloud gudeheeda ama degmooyinka (counties) Benton, Sherburne ama Wright. 10% codsadayaasha la doortay waa in ay noqdaan kuwa aan mudnaanta la siinin.
- Codsdadaasha lagu doorto bakhtiyaa-nasiib looma dammaanad/ballan qaadayo in ay heli doonaan foojar. In laguu soo xusho bakhtiyaa-nasiibka waxaa loola jeedaa oo keliya in codsiyada la gelin doono liiska sugitaanka.
- Marka aad gasho liiska sugitaanka, waxaa laga yaabaa inaad heshid foojar, laakiin kaliya haddii aad xaq u leedahay Housing Choice Voucher Program sida Sharciga Federaaliga ah qabo iyo kaliya haddii St. Cloud HRA foojar kuu heli karto.

Macluumaadka Barnaamijka

Housing Choice Voucher Program waa barnaamij ay maal-geliso dawlada federaalku oo ka caawisa qoysaska dakhligoodu hooseeyo inay iska bixiyaan ijaarka qiiimaha suuqa guryaha sida gaarka ah loo leeyahay. Kiraystaha ayaa soo helaya guri (shuruudaha qaarkood buuxiyay); Ka-qaybqaataha (qofka foojarka la siiyey) ayaa bixiya 30-40% dakhliga guud ee reerka; HRA waxay si toos ah u siisaa mulkiilaha qayb kirada ah.

Tusaalahu kirada 30% ee dakhliga: Qoyska leh hal qof oo wakhti buuxa shaqeeya oo qaata \$15.00/saacadii waxaa laga yaabaa inuu bixyo \$780 bil kasta kirada.

Tani waa kaalmo-kab kireystaha la socota/raacaysa (kiro kabitaanku wuxuu la guuraa kiraystaha).

Xaddidaada Dakhliga

Si aad ugu qalanto foojar, dakhligaaga guud ee sanad kasta waa inuu ahaadaa ama ka hooseeya xadka daqliga hoos ku taxan.

Degmooyinka Stearns & Benton

Tirada Qoyska	Xaddidaada Dakhliga
1	\$27,650
2	\$31,600
3	\$35,550
4	\$39,500
5	\$42,700
6	\$45,850
7	\$49,000
8	\$52,150
9	\$55,300

Magaalooyinka Sherburne & Wright

Tirada Qoyska	Xaddidaada Dakhliga
1	\$36,750
2	\$42,000
3	\$47,250
4	\$52,450
5	\$56,650
6	\$60,850
7	\$65,050
8	\$69,250
9	\$73,450